# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

**JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMALIYA**

لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 5aad** — Muqdisho, 25 Abriile 1977 **2.R.A.**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.**

**FAAFIN BIL SOO BAX.** — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 34 ee 27 Maarso 1977, *meeli marin Heshiska Amaahda ee Dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo keydka gaarka ah ee «OPEC»* — Bogga 397

LAW No 34 27th March 1977, *Instrument of Ratification.* — » 398


### BOGGA LABAAD

### X E E R


XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Maarso 1977, *Guddoonsiin Billad Dahab ah ee Waddaninmo Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed L. 32* — » 399

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 8 Maarso 1977, *Guddoonsiin Billado waddaninimo Jaalayaal u soo halkamay Gobannimada Soomaaliyeed L. 33* — » 400

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 9 Maarso 1977, *Cad dhuul Dawladeed la siiyey Jaalle Maxamuud Cali Afrax ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley kuna fadhiya mq. 450 L. 34* — » 401



WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO

XEER WASAARADDA GANACSIGA ee 15 Maarso 77; *Iskaashatada ganacsiga «Ganaane» L. 35* » 403

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.77, Naada Dhul Jaalle Maxamuud Xaaji Cabdiraxmaan L. 184 » 404

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Cabdikariin Maxamed Xersi L. 185* » 405

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Xasan Nuur Maxamed L. 186* » 406

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Safiya Xaaji Cusmaan L. 187* » 407

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Caasha Cabdulle Yuusuf L. 188* » 408

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Maxamed Maxamuud Yare Cusmaan L. 189* » 409

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Axmed Shariif Cabdullaahi L. 190* » 410

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Maryan Faarax Warsame L. 191* » 411

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Maryan Xaaji Nuur L. 192* » 412

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Ibraahim Xawaadle Mamar L. 193* » 413

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada Dhul Jaalle Xaljiima Gigaal Xasan L. 194 » 414

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada Dhul Jaalle Cabdulxamiid Maxamed Cali Cali L. 195 » 415

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Cali Cumar Macallin L. 196* » 416

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Cabdulqaadir Xasan Jaamac L.197* » 417

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 23.3.1977 Naada *Dhul Jaalle Saalax Maxamed Cawad L. 198* » 418

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 4.4.1977, Naada Dhul Jaalle Maxamed Cooble Cadde L. 199 » 419

SHIRKADDA NUCLEARE SOMALA S.P.A, 30.3.1977, *Oggeysiis Isugu. Yeerid ah L. 200* » 420

SOCIETA NUCLEARE SOMALA S.P.A, 30.3.1977, Convocazione di Asssemblea L.200/Bis » 421

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG 29.9.76 lumid Jeegga wareega lamb. 19556 uu leeyahay Saciid Warsame Ducaale lam. 201 » 422

WARSHADDA MARMARKA, 25.4.77. Oggeysiis Shir » 423




SHARCI L. 34 ee 27 Maarso 1977, meel marin heshiiska Aamahda ee Dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Keydka gaarka ah ee «OPEC»

MADAXWEYNAHA

J.D.S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo 3aad ee kacaanka 21kii Oktoobar, 1969.

MARKUU ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1dii Luulyo 1976.

MARKUU ARKAY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee 24kii Febaraayo, 1977.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Keydka Gaarka ah ee «OPEC», oo la kala saxiixday Jannaayo 12, 1977, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, sida waafaqsan qodobkiisa 5aad.

Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 27.3.1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

**LAW NO. 34, 27th March 77 Instrument of Ratification**

## THE PRESIDENT OF THE

## SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

**HAVING SEEN:** The 1st,, 2and.,, and 3rd Charters of October 21st. Revolution 1969.

**HAVING SEEN:** Law No. 1 17. 18 and 19 of 1st. July 1976.

**TAKING NOTES:** or the approval of the political Buroali and the Council of Ministers on 14th February, 1977.

Hereby promulgates the following Law.

### Article 1

The loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republis and the Opec Special Fund, signed on January 12, 1977 is hereby ratified.

### Article 2

The Agreement shall have the force of law in the Territory of Somali Democratic Republic in accordance with its Article 5.
This law shall be published in the Official Bulletin of Somali Democratic Republic.

Muqdisho, 27.3.1977

Bresident of the Somali Democratic Republic

*Major General Moxamed Siad Barre*

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Maarso 1977 Guddoonsiin Billad Dahab ah ee Waddaninimo: Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed. L. 32

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lah. 1 ee 1da Luulyo 1976 iyo Sharciga lam. 18 ee 1.7.1976;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65 ee 19kii Oktoobar 1970;
MARKUU TIXGELIYEY: Codsigii Shirweynaha 1aad ee Ururka Haweenka Dimuqraadiga Soomaaliyeed, Shirweynahaasoo lagu Guddoomiyey in Xoghayaha Guud ee XHKS lagu Maamuuso Billad Dahab ah ee Waddaninimo isagoo loo aqoonsanaayo kaalinta taariikhda ah uu ka qaatay xaqiijinta mabda'a sinnanta Ragga iyo dumarka Soomaaliyeed . sare u qaadidda Garaadka siyaasiga ee Haweenka Soomaaliyeed iyo ka xoreyntooda caadooyinkii iyo fikradihii isku dul noolaadka ku qotomay;

WUXUU GUDDOOMIYEY

XEERKA SOO SOCDA:

Qodob Keliye

Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Waxaa lagu maamuusay Billad Dahab ah. ee Waddaninimo.

Muqdisho 5sta Maarso 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(S/gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 8 Maarso 1977 Guddoonsiin Billado Waddaninimo Jaallayaal u soo halgamay Gobannimada Soomaaliyeed L. 33

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 1 ee 1da Luulyo 1976 iyo Sharciga lam. 18 ee 1.7.1976;

MAKRUU ARKAY: Sharciga lam. 65 ee 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: In Jaallayaasha Xalimo Maxamed Yuusuf, Raaxa Ayaanle Guuleed, Xaliimo Maxamed Faarax, Xaawo Guure Cali, Xaawo Cumar Cawad iyo Maryan Cabdi Maxamed ay ka mid ahaayeen geesiyaashii hakiyey tabaha gumeysiga waqtigii Gobannimodoonka iyo dhaqdhaqaaqii Xisbigii la oran jirey Ururka dhalliyarada Soomaaliyeed (SYL), una aqoonsaday inay kaalin lama illoowaan ah ay ka qaateen mideynta Ummaddeenna iyo badigoobka xornimada Dalalka Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo aqoonsado qof kasta kaalinta uu daryeelka danaha Dadkiisa iyo Dalkiisa ka qaatay, raad dhaxal gal ahna looga reebo, lana dareensiiyo Naftood—hurayaasha Waddaniyiinta ah, daacadda ah, niyadda san, Ummaddoodu inaanay marnaba illaabeynin halgankooda xaqa iyo xalaasha ah, taariikhda Dalkoodana ay ka gelayaan baalka ay ka mudan yihiin;

WUXUU GUDDOOMIYEY

XEERKA SOO SOCDA:

Qodob keliya

Waxaa lagu maamuusay Jaallayaasha hoos ku xusan Billadda magaceeda ku hor qoran:

1. Xaliimo Maxamed Yuusuf Billad Dahab ah ee Waddaninimo;
2. Raaxa Ayaanle Guuleed Billad Lacag ah ee Waddaninimo;
3. Xaliima Maxamed Faarax Billad Maar ah ee Waddaninimo;
4. Xaawa Guure Cali Billad Maar ah ee Waddaninimo;
5. Xaawo Cumar Cawad Billad Maar ah ee Waddaninimo;
6. Maryan Cabdi Maxamed Billad Maar ah ee Waddaninimo;

Muqdisho, 8da Maarso 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre*



XEER WASARADDA HAWLAHA GUUD ee 9 Maarso 77, cad dhul Dawladeed, la siiyey Jaalle Maxamuud Cali Afrax ku yaal Muqdisho degmada Wardhiigley kuna fadhiya mq. 450 L. 34

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Warqaddii Waawood, lamaad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Setember 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lam. 6 soona baxday 9 Jannaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjiga uu keensaday Maxamuud Cali Afrax markay taariikhdu ahayd 28/8/1966 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed ku yaal Muqdisho — Degmada Wardhiigley, kuna dhacaaya Qaybta VI.

ISAGOO AQOONSAN: Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda lam. 6/9 ee 30.9.1967 iyadoo cidina horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 3800, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Xamar, Fadhigoodii 18aad taariikhdeeduna ahayd 12.12.1967 kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. 96656 ee 28.12.1967 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeynaysa in Maxamuud Cali Afrax uu bixiyey lacag dhan Sh. SO. 675 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 450 loona tiriyey Maxamuud Cali Afrax sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Dhismaha dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 28.12.1967;

ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah,

## XEER

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, Jaalle Maxamuud Cali Afax kana dhisan Guri iyo derbi wareegsan (Dekereeto di concessione) dhul ku fadhiya mq. 450 kuna yaal Muqdisho — Degmada Wardhiigley.

Muqdisho, 9 Maarso. 1977.

W A S I I R K A
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY*
*Diiwaan lamb. 1 Bogga lamb. 9*
*Muqdisho, 20 Maarso 1977.*
*Ku xigeenka Hantidhawrka Guud*
*Yuusuf Cali Nuur*



XEER WASAARADDA GANACSIGA ee 15 Maarso 1977,
*Iskaashatada Ganacsiga «Ganaane» L. 35*

*WASAARADDA GANACSIGA*

WASIIRKA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 40.10.1973.

ISAGOO ARKAY: Arjiga uu soo qortay Guddoomiyaha Iskaashatada Ganacsiga Basasha ee la magac baxday «Ganaane» ee Degmada B/Dhere.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Taladii Wasiirka Beeraha iyo tan Guddiga Iskaashatooyinka ee Gobolka Gedo.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga «Ganaane» ee saldhiggeedu yahay Magaalada Baar-dheere Shaqadeeduna ay tahay inay ka gadato Basasha Beeraleyda degmada Baar-dheere ka dibna u iibgeyso Gobollada iyo Degmooyinka looga baahan yahay, waxa laga diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lam. yahay 40ka oo dhaqan galay 4.10.1973.

Qodobka 2aad

Marka laga billaabo maalinta xeerkani lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Ganacsiga «Ganaane» ee Degmada Baar-dheere waxay yeelanalsaa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqan galayaa.
Muqdisho, 15.3.1977

WASIIRKA DAWLADDA

*(Jaalle S Guuto Maxamed Cali Shire)*

*BOGGA SADDEEXAAD*

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

*Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Xaaji Cabdiraxmaan* u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 24.10.74 uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisu yihiin sida boos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam.69k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 71k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 184

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdikariin Maxamed Xirsi, u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 5.5.68. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar· degmada Shibis qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 20X32 kuna fadhiya 640 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyil waxaa ka xiga: Lotta lam. 29.

Koonfur waxaa ka xiga: Lotta lam. 21.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo,

Bari waxaa ka xiga: Lotta lam. 15.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 185

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Nuur Maxamed u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2.7.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 138.

Bari waxaa ka xigooa: dhul lam. 140.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhu ka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 186



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Safiya Xaaji Cismaan. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii haariikhdu ahayd 8.1.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisnua yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 47k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 34k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 36k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhu ka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 187

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynal in Jaalle Caasha Cabdulle Yuusuf. u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 12.12.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 289k.

Bari Waxaa ka xiga: dhul lam. 291k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 188



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Maxamuud Yare Cusmaan; u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 20.9.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 277k.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka Xiga: dhul lam. 249k.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 189

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Shariif Cabdullaahi. u soo portay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 3.8.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaldatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 28X20 kuna fadhiya 560 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka Xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 253k.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 279k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 281k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 190



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Faarax Warsame u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 15.6.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 23.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 10.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 12.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 191

# N A A D O  D H U L

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Xaaji Nuur. u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 15.6.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 24.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 11.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 16. Maarso 1677

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid*

L. 192



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

# N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibraahim Xawaadle Madar u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka taariikhdu ahayd 11.10.-75 uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yiyihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid:

Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 236k.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 234k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 264k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 16. Maarso 1677

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid*

L. 193

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaliima Cegaal Xasan. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.11.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar dimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lma. 282k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 284k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 16. Maarso 1677

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Csudunuus Cusmaan Keenidiid)*

L. 194



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulxamiid Maxamed Cali. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 10.8.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka Xiga: dhul lam. 177.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 203.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 205.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 16. Maarso 1677

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydunuus Cusmaan Keenidiid*

L. 195

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD
## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Cumar Macallin. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka Maalintii taariikhru ahayd 30.-12.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 16X17. kun fadhiya 272. mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooy iwaxaa ka xiga: Macow Suuley.

Koonfur waxaa ka xiga: Maxamed Nuur.

Galbeed waxaa ka xiga: Ciise Cumar.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid*

L. 196



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caddulqaadir Xasan Jaamac u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 27.8.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 6000 mdh. Soohdimihoosuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lambar. 91k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga Jid.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam: 8k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid*

L. 197

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saalax Axmed Cawad. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 20.3.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Cabdulcasiis qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 20X58,70. kuna fadhiya 117. mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Gal lam. 49/63.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Gal lam 254/59.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 198



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cosoble Cadde u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taarkiihdu ahayd 2.11.1976, uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 3X30 kuna fadhiya 90 mdh. Soomdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: dhulkiisi hore.

Barri waxaa ka xiga: Axmed Sh. Isaaq.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Maarso 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

L. 199

## SHIRKADDA NUCLEARE SOMALA S.P.A.

Maalka asaasiga u ah Shirkadda dhammaan lagu shubay Sh. SO. 1.000000 ee u dhigan Maxkamadda Muqdisho lamb«
796 Buugga Shirkadda Saldhiggeedu yahay Muqdisho.

### XARUNTA XAMAR

### OGEYSIIS ISUGU YEERID AH

Waxaa la ogeysiinayaa dadka ku jira Ururka guud Caadiga, ay isku imaanayaan maalintii 22 Abriil 1977 marka saacaddu tahay 10 subaxnimo fadhigaasoo lagu qaban doono Xarunta Xafiiska ACIP ENI — sarta 1. ku taal San Donato Milanese (Italia) ee marka labaad maalinta 10 Majo 1977 saacaddu iyo meesha lagu qaban doono ee yihiin sida fadhiga koowaad, si looga hadlo waxyaalaha hoos ku yaala:

### AJENDAHA MAALINTA AH

Dhinaca caadiga

1) Warbixinta guddiga maamulaha iyo hanti dhowrka;

2) Go'aankii Miisaaniyadda Sannadka 1976.

### DHINACA SHAQO DHEERAADKA.

1) Xiritaanka la soo Horumariyey ee Shirkadda.

2) Magacaabid dadka xuquuqda bixinaaya iyo caddeyn awooddooda.

Waxaa ka soo qeybgelikara dadka ku jira Shirkadda oo xaq u leh sida sharciga u qoran uu qabo:

Muqdisho 7 Maarso 1977,

GUDDOOMIYAHA
*F/to Ing. EMilio Pacchiarotti*

L. 200



## SOCIETA' NUCLEARE SOMALA S.P.A

Capitale Sociale 1.000.000 Sh. SO.
Iscritta al Tribunale di Mogadiscio n. 796
Registro Societa'

### SEDE DI MOGADISCIO

### CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA

I Signori Azionisti sono invitati a partecipare all'Assemblea Annuale degli Azionisti che si terra' il giorno 22 aprile 1977 alle ore 10 presso di uffici dell'Agip — Attivita' Minerarie, I. Palazzo Eni in San Donato Milanese (Italia) e, occorrendo, in seconda convocazione in giorno 10 maggio 1977 alla stessa ora e Lougo per discutere e deliberare sul seguente:

### ORDINE DEL GIORNO

Parte ordinaria:

1) Relazioni del Consiglio di Amministrazione e del Collegio

2) Bilancio al 31.12.1976 e deliberazioni relative parte straordinaria:

1) Scioglimento anticipato della societa'

2) Nomina dei liquidatori e determinazione dei loro poteri

Possono intervenire gli Azionisti che hanno diritto al voto ai termini dello Statuto Sociale.

Muqdisho 7 Maarso 1977,

Il Presidente
Ing. Emilio Pacchiarotti

L. 200

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAG

BANIGIGA GANACSIGA UMMADDA LAANTA
CEERIGAABO

Maxkamadda Gobolka. Haddii ay aragtay weydiinta uu soo qortay Jaalle Saciid Warsame Ducaale.

Haddii uu arkay Qod. 69 D.L. 2. ee 9.9.65 haddii uu ogaaday inay awooddiisa tahay.

Wuxuu sugayaa lumidda jeegga wareega ee L. 19556. lacagta ah Sh.

2000.— (laba kun) oo shillin kuna soo baxay bangiga Ganacsiga laanta Ceerigaabo.

WUXUU AMRAYAA

1. In la baabi'iyo Jeegga lamb. yahay 19556.

2. Inuu Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Ceerigaabo u celiyo Jaalle Saciid Warsame Ducaale lacagtii ku qoreyd jeegga wareega ee kor ku xusan.

3. In lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah Baadi'inta jeegga kor ku qoran.

4. Waxaa lacagta la celin karaa 30 Casho (Soddon) kaddib marka lagu soo saaro Faafinta rasmiga ah'

Guddoomiyaha Maxkam. Go. San. Cerigaabo.
*Cabdulqaadir Cabdullaahi Saalax*

L. 201



WARSHADDA MARMARKA, 25.4.77. Ogeysiis Shir

OGEYSIIS SHIR SAAMILEY AH

Waxaa dhammaan laysagu yeerayaa saamileyda Shirkadda Warshadda Marmarka iwm. inay ka soo qayb galaan shirka Saamileyda caadiga ah oo lagu qaban doono Xarunta sharikadda ee Xamar saacaddu markay thay 17/ ama shanta galabnimo bisha Maajo 29keeda, haddуu shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Juunyo maalinta ay tahay 6 da isku saacadda kor ku qoran.

Saamileyda sharikadda ee lahaanshaha saamiyaasha ku qoranu aaney ka hubsaneyn maamulka sharikadda, waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaashooda saldhigga sharikadda ilaa intii shirku ka dhammaado.

ARRIMAHA DOODDA

1) Oggolaadka dheellitirka xisaabaadkii sannadkii 1976.

2) intaas iyo wixii kale oo soo raaca.

Muqdisho, 25.4.77

*GUDDIGA MAAMULKA*

*L. 201/Bis*